



LA KULAN SUSANNAH!


LUUQADAADU WAA HIBO

Talooyinka Luqadda Ku Saleysan Hantida

WAA MAXAY HANTI KU SALAYSAN?

Waxaa laga yaabaa inaad dugsigaaga ka heshay dukuminti ku tilmaamaya ardaygaaga inuu yahay **Qof Baranaya Luqadda Ingiriiska (ELL)**. Inta uu ilmahaagu baranayo Ingiriiska, waxaan soo jeedinaynaa in la isticmaalo ereyga **arday luqado badan ku hadla** si loogu muujiyo in luqadaha uu ilmahaagu ku hadlo yihiiin hadiyad halkii ay ka ahaan lahaayeen caqabado.

Luuqadda aan isticmaalno waxay saamaysaa sida dunidu u aragto ilmahaaga. Tusaalooyinka hoose waxay muujinayaan sida luqadaha Susanna loogu arki karo hadiyad ama caqabad.



U EEGISTA LUQADAADA SIDA CAQABAD AHAAN (YARAAN KU SALAYSAN)

- Susannah waxay ku wareersan tahay inta u dhaxaysa laba ama in ka badan oo luqadood
- Susannah waxay taqaanaa kaliya dhawaaqa dhawr xarfood oo Ingiriis ah
- Lahjadda Susannah aad bay u culus tahay mana fahmeysa Ingiriiska
- Waa inaad kaliya Susannah kula hadashaa Ingiriis sababtoo ah ku hadalka luuqadaha kale waxay hoos u dhigi doontaa horumarkeeda dhanka Ingiriiska



U EEGISTA LUQADAADA SIDA HADIYAD AHAAN (HANTI KU SALAYSAN)

- Susannah waxay isticmaashaa dhammaan luuqadaheeda si ay macno u samayso
- Susannah waxay taqaan dhawr dhawaaq oo Ingiriisi ah IYO xirfadaha aasaasiga ah ee luuqadeeda (luuqadaheeda) guriga
- Lahjadda Susannah waxay muujinaysaa hibada ay u leedahay in ay ku hadasho luqado badan
- Ku hadalka Susannah ee afkeeda hooyo waxay ka caawin doontaa:
 - inay barato oo qiimeyso luuqadeeda guriga iyo Ingiriiska labadaba
 - inay ilaaliso xiriirkha ay la leedahay qoyskeeda iyo dhaqankeeda



LEARNING, TEACHING
psesd
AND FAMILY SUPPORT